Tixraaca: XRW/591/10/2025

Taariikh: 05/11/2025

Ku: Wasaaradda Maaliyadda — Muqdisho
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada — Muqdisho
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya — Muqdisho

UJEEDDO: GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA "ISTARAATIIJIYADDA MUDDADA DHEXE EE MAAREYNTA DEYMAHA (2025–2029)"

XRW - BIXIT
08 NOV 2025
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **MOF/OM/0351/2025** ee ku taariikheysan **28/10/2025** ee Wasaaradda Maaliyadda, kuna saabsan codsiga soojeedinta "Istaraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha";

Markuu arkay: Qodobka 2aad farqada (2) ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada ee 2024;

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.32.135.10.25** ee **30/10/2025**, kuna saabsan **"Istaraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (2025–2029)"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimada ay u leedahay Istaraatiijiyadani Maareynta Deymaha;

Waxaa uu meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.32.135.10.25** ee **30/10/2025**, kuna saabsan "**Istaraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (2025–2029)**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Qodobka 2aad

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana "Istaraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (2025–2029)".

Qodobka 3aad

Dhaqangal

Go'aanka Golahu waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Istaraatiijiyaddanna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ★ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA ★ FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA ★ OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

Ref: MOF/OM/0351/2025

October 28, 2025

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Og: Agaasimaha Golaha Wasiirada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda
Og: Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirada ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

Ujeedo: Usoo Gudbinta Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha Ansixinta Golaha Wasiirrada

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Aniga oo raacaya Qodobka 2(2) ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha ee 2024, kaasoo ku waajibinaya Wasaaradda Maaliyadda inay diyaariso oo u gudbiso Golaha Wasiirrada Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha, waxaa sharaf weyn ii ah inaan halkan ku soo gudbiyo Istiraatiijiyaddii ugu horreysay ee Soomaaliya ee Maareynta Deymaha, taasoo daboolaysa muddada shanta sano ah ee 2025–2029, si ay u ansixiyaan Golaha Wasiirrada.

Diyaarinta Istiraatiijiyaddan waxaa saldhig u ahaa wadatashiyo iyo xog-ururin ballaaran oo farsamo, kuwaasoo ay ka qayb galeen hay'ado heer qaran iyo kuwo heer caalami ah, oo ay ku jiraan Bangiga Adduunka, Sanduuqa Lacagta Adduunka, iyo Bangiga Horumarinta Afrika, si loo hubiyo in Istiraatiijiyaddu ay waafaqsantahay hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee caalamiga ah.

Mudane Ra'iisul Wasaare, guud ahaan, Istiraatiijiyaddan waxay dejinaysaa xayndaab siyaasadeed oo cad, kaasoo hagaya maamulka deymaha muddada dhexe. Gaar ahaanna, hirgelinta Istiraatiijiyaddan waxay xaqiijin doontaa in go'aannada mustaqbalka ee ku saabsan deyn qaadashada lagu saleeyo hannaan siyaasadeed oo adag, qorsheysan, isla markaana si xeel dheer loo dhisay.

Sidaas darteed, waxaan si xushmad leh ugu soo gudbinayaa Golaha Wasiirrada Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (2025–2029) si loo ansixiyo, iyadoo la raacayo Qodobka 2(2) ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada ee 2024.

Mahadnaq iyo qadarin,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE
WASAARADA MAALIYADDA

Xildh. Biixi Iimaan Cige
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

ISTIRAATIIJIYADDA MUDDADA DHEXE EE MAAREYNTA DEYMAHA (2025 – 2029)

Waxaa diyaariyay Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya

TUSMO

Qaybta Hore: Liiska Eray-Bixinta.. 1-2

Qaybta 1-aad: Dulmar Gaaban...3-5

Qaybta 2-aad: Horudhac..6

A. Xaaladdaha Keenay Dejinta Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS).. 6

B. Ujeeddooyinka iyo Hab-raaca... 6-8

Qaybta 3-aad: Hannaanka Dhaqaale iyo Maaliyadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.. 9-11

Qaybta 4-aad: Falanqaynta Deymaha Hadda Jira...12

A. Xaaladda Deymaha Hadda Jira ee Dhammaadkii Sanadka 2024...........................12-14

B. Falanqaynta kharashka iyo halista ee deynta hadda jirta ee Soomaaliya................ 14-17

1. Khatarta Dib-u-Maalgelineed (Refinancing Risk)...15-16

2. Khatarta Heerka Kharashka Maalgelinta (Financing Cost)...................................... 16

3. Khataraha Lacagaha iyo Sicirka Sarrifka.. 16-17

Qaybta 5-aad: Qiimeynta Xalalka iyo Ilaha Suurtagalka ah ee Maalgelinta iyo Deymaha..18

A. Xaddidaadaha Saaran Amaahda Dibadeed ee aan Lahayn Shuruuddaha Deeqsiga ah....... 18-19

B. Xaddidaadaha Saaran Qaadashada Amaahda Gudaha..19

Qaybta 6-aad: Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee 2025–2029...20

A. Xulashooyinka Kala Duwan ee Istiraatiijiyadaha Deymaha ee La Dersay.................. 20

Istaraatijiyadda 1-aad (S1) – Sii Wadida Isticmaalka Amaahda Shuruudaha Deeqsiga ah leh ee Hay'adaha Caalamiga ah iyo Wadamada Saaxibada ah...........................20-21

Istaraatijiyadda 2-aad (S2) – Sii Isticmaalka Amaahda Shuruudaha Deeqsiga ah leh iyadoo La Helaayo Maalgelin Mashaariic oo Shuruudo Deeqsi ah Leh.......................21

Istiraatiijiyadda 3-aad (S3) – Sii Wadidda Isticmaalka Amaahda leh Shuruudaha Deeqsiga ah Iyadoo la Horumarinayo Suuqa Deynta Gudaha................................ 21-22

Istiraatijiyadda 4 (S4) – Istiraatijiyadda 3-aad oo Lagu Daray Maalgelin Mashaariiceed oo Qayb ahaan Deeqsi ah... ***22-23***

B. Falanqaynta Kharashka iyo Halista ee Istiraatijiyadaha Kala Duwan ee Deynqaadasho... 23

1.Tilmaamayaasha Kharashka 24-25

2.Tilmaamayaasha Khatarta 25-26

C. Istiraatijiyadda La Doorbiday...26-27

Qaybta 7-aad: Talaabooyinka la Qorsheeyay ee Lagu Fulinayo Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee 2025–2029...........................28

A. Diyaarinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka...............................28

B. Hufnaanta Deynta iyo Xiriirka Deyn-bixiyayaasha... 28-29

Qaybta 8-aad: Gunaanadka iyo Tallaabooyinka Xiga..30-31

A. Gunaanad... 30

B. Tallaabooyinka Xiga...30-31

Qaybta Hore: Liiska Eray-Bixinta

1. **“Celceliska Waqtiga Dayn-bixinta (Average Time to Maturity)”** wuxuu cabbiraa muddada celceliska ah ee dib-u-bixinta deymaha asalka ah. Guud ahaan, wuxuu muujiyaa waqtiga lacagta deymaha ah ay tahay in la bixiyo, si loo fahmo sida iyo goorta ay tahay in deymahaas dib loo bixiyo.

2. **“Celceliska Waqtiga Dib-u-dejinta Kharashka Maalgelinta (Average Time to Re-fixing)”** waa cabbir muujinaya celceliska miisaaman ee waqtiga ay qaadanayso ilaa iyo inta kharash maalgelin (financing cost) oo cusub lagu soo rogaayo dhammaan noocyada kala duwan ee deymaha asalka ah ee la qabo.

3. **“Deyn-bixiye Laba Geesood ah (Bilateral Creditor)”** waa dowlad ama hay’ad dawli ah oo ka socota hal dal, taas oo si toos ah amaah u siisa dowlad kale.

4. **“Dib-u-bixinta Hal-marka ah ee Deynta (Bullet Repayment)”** waa hab dib-u-bixin deyn ah oo lagu bixiyo deynta asalka ah hal mar oo keliya marka la gaaro muddada rasmiga ah ee dib-u-bixinta (maturity). Habkan ma jiraan deyn-bixinno qayb-qayb ah inta lagu jiro muddada deynta, balse deyn-bixinta oo dhan ayaa la sameeyaa dhamaadka muddada dib-u-bixin daynta.

5. **“Deynta Taagan (Debt Outstanding)”** waa qadarka lacageed ee ka yimid deyn lasoo qaatay, kaas oo wali aan dib loo bixin ama aan la cafin.

6. **“Deynka Gudaha (Domestic Debt)”** waa wadarta guud ee deymaha ee Dawladda ku leeyihiin deyn-bixiyeyaal degan gudaha Dalka, oo uu ku jirto Bangiga Dhexe. Qeexitaankan waxaa ka reeban horumariska ku meel-gaarka ah ee Bangiga Dhexe uu siiyo Dowladda, kaas oo loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha degdegga ah ee lacageed ee Dawladda.

7. **“Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe ee Sanduuqa Lacagta Adduunka (ECF)”** waa barnaamij uu Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) bixiyo kaasoo dalalka dakhligoodu hooseeyo siinaya taageero maaliyadeed oo muddo-dhexe ah, gaar ahaan marka ay dhibaato ka haysato bixinta lacagaha caalamka ay u rabaan. Taageeradan waxaa loogu talagalay in lagu xoojiyo koboca dhaqaalaha, laguna yareeyo saboolnimada.

8. **“Barnaamijka Dayn Cafinta ee Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (Heavily Indebted Poor Countries - HIPC)”** waa barnaamij ay sanadkii 1996 bilaabeen Sanduuqa Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunka, kaasoo looga golleeyahay in dalalka saboolka ah aanay la kulmin culeys deyn oo aan laga soo bixi karin. Si dal uu uga faa’iideysto Barnaamijka Dayn Cafinta ee Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (HIPC), waxaa looga baahan yahay inuu buuxiyo shuruudo gaar ah, qaato isbeddelo siyaasadeed oo dhanka dhimista saboolnimada ah, isla markaana uu muujiyo raad-raac muuqda oo ku saabsan fulinta tallaabooyinkaas.

9. **“Deyn-bixiye Caalami ah (Multilateral Creditor)”** waa hay’ad caalami ah oo ay wada leeyihiin dowlado iyo dalal badan, taasoo dhaqaale siisa ama amaahidaa dalalka kale si ay uga caawiso horumarinta dhaqaalaha iyo fulinta mashaariicda muhiimka ah, sida kaabayaasha dhaqaalaha, waxbarashada, iyo adeegyada caafimaadka.

10. **“Naadiga Paris (Paris Club)”** waa koox aan rasmi ahayn oo ka kooban deyn-bixiyeyaal dowladeed, kuwaas oo u shaqeeya sidii dalalka ay deynta ku leeyihiin uga caawin lahaayeen helitaanka xalal waara oo lagu xakameyn karo daymaha. Deyn-bixiyayaasha ku jira Naadiga Paris waxay dalalka ay deynta ku leeyihiin siiyaan habab maareyn oo kala duwan, oo ay ku jiraan dib-u-jadwaleynta daymaha (rescheduling) iyo/ama dib-u-jadwaleynta deymaha ee gacan-siinta leh (concessional rescheduling), taasoo muddo cayiman ka yareynaysa dalalka waajibaadka deyn-bixinta.

Qaybta 1-aad: Dulmar Gaaban

Iyadoo la raacayo hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah ee maaraynta deymaha guud, isla markaana la waafajinayo qodobbada Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo Saarista Dammaanaddaha, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa, markii ugu horreysay, hirgelinaysa Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS).

Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee sannadaha 2025–2029 waxaa loo diyaariyey si waafaqsan faqradda 2-aad ee Qodobka 2-aad ee Xeernidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo Saarista Dammaanaddaha. Waxaa sidoo kale lagu saleeyay hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah ee maaraynta deymaha guud, si loo hubiyo in go'aamada la xiriira deymaha lagu saleeyo xog la hubo, islamarkaana lagu taageero xasilloonida dhaqaalaha iyo horumarka waara ee Dalka.

Hadafka ugu weyn waa in la soo jeediyo hannaan ku habboon oo lagu maalgelin karo qorshayaasha muddada dhexe ee 2025–2029, si loo yareeyo kharashaadka iyo halista la xiriirta deymaha guud ee Dowladda.

Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee sanadaha 2025–2029 waxay bixinaysaa hannaan nidaamsan oo dhammaystiran, kaas oo ka caawinaya Dawladda in go'aamada maareynta deymaha lagu saleeyo xog la hubo oo waafaqsan hababka caalamiga ah. Istiraatiijiyaddan waxay sidoo kale xaqiijineysaa in maamulka deymaha uu noqdo mid waara, isla markaana lagu yareeyo khataraha dhaqaale ee suurtagalka ah.

Iyadoo u hoggaansamaysa mabaadi'da Islaamiga ah iyo kuwa maaliyadeed ee Soomaaliya, Dowladda Federaalka waxaa si buuxda uga go'an in ay xaqiijiso in dhammaan hannaanka deymaha iyo maalgelinta ee guud uu waafaqsan yahay hab-raaca Sharciga Islaamka. Sidaa darteed, dhammaan deymaha iyo noocyada kale ee maalgelinta waxa loo sii dejin doonaa iyada oo aan dulsaarka lagu salayn, halka kharash kasta oo la xiriira deymaha iyo maalgelintuna uu ka tarjumayo oo kaliya kharashaadka maamulka, ka hortagga khataraha (risk mitigation), ama kharashyada adeegyada ee suurtagelinaaya hawlaha kala duwan ee deyn iyo maalgelin qaadashada. Go'aankan waxa uu hubinayaa in hababka maareynta deymaha ee Dalka ay waafaqsan yihiin mabaadi'da maaliyadda Islaamiga ah, iyadoo sidoo kale lagu xaqiijinaayo maareynta waarta ee deymaha.

Mabaadi'da aasaasiga ah ee maareynta deymaha ee Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS) ayaa ah kuwan soo socda:

- Mudnaanta waxaa la siinayaa deymaha dibadda ee leh shuruudaha deeqsiga ah (highly concessional), si loo maalgeliyo mashaariicda horumarineed oo muhiim u ah Dalka. Waxaa la hubin doonaa in deymaha la qaadayo ay yihiin kuwo deeqsi ah, isla markaana heerarka guud ee deymaha ay yihiin kuwo la maareyn karo oo waafaqsan awoodda dhaqaale ee Dalka.

- Waxaa la qiimeyn doonaa suurtagalnimada iyo qaababka loo soo saari karo dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda (treasury bills) ee loogu talagalay suuqyada gudaha, sanadaha dambe ee Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS). Tani waxay la socon doontaa aasaasidda iyo dhaqan-gelinta Nidaamka Maareynta Sarrifka Sugan ee Shilin Soomaaliga cusub (Currency Board), si loo xoojiyo xasiloonida lacageed iyo kalsoonida suuqyada maaliyadeed ee gudaha.

- Waxaa la qiimeyn doonaa sida deymaha cusub ee leh shuruudo deeqsigoodu hooseeyo, ee loogu talagalay maalgelinta mashaariicda horumarineed ee muhiimka ah, ay saameyn ugu yeelan karaan dhaqaalaha Dalka muddada dhexe, iyadoo la hubinayo in deymahan cusub ay weli waafaqsan yihiin xayndaabka deymaha deeqsiga ah, islamarkaana ku habboon yihiin xaaladda dhaqaale ee Dalka.

Iyadoo la raacayo mabaadi'da aasaasiga ah ee kor lagu soo sheegay, afar istiraatiijiyadood oo ku saabsan maareynta deymaha ayaa la qiimeeyay intii lagu guda jiray diyaarinta Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), kuwaas oo kala ah:

- **Istiraatiijiyada 1-aad:** In boqolkiiba boqol (100%) baahiyaha maaliyadeed ee Soomaaliya lagu daboolo amaah leh shuruudo deeqsinimo sare leh (highly concessional), taas oo ka jaban midda suuqa caadiga ah, isla markaana la jaanqaadaysa heshiisyada deynta ee Dowladu la gashay dalalka iyo hay'adaha deynta ku leh Dalka ee hadda ku jira galka deynta.

- **Istiraatiijiyada 2-aad:** Sii joogteynta adeegsiga amaahda leh shuruudo deeqsinimo sare (highly concessional), iyadoo sidoo kale lasoo qaadanaayo amaah shuruudaha deeqsigeedu yaryahay (lower concessional terms) oo loogu talagalay maalgelinta mashaariicda horumarineed, si si wax looga qabto baahiyaha horumarineed ee Dalka.

- **Istiraatiijiyada 3-aad:** Sii joogteynta isticmaalka amaahda leh shuruudo deeqsinimo sare (highly concessional), iyadoo la horumarinayo suuqyada deymaha gudaha Dalka inta lagu jiro labada sano ee ugu dambeysa muddada Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS).

- **Istiraatiijiyada 4-aad:** In la adeegsado isku-dhafka Istiraatiijiyada 3-aad iyo amaah leh shuruudo deeqsi dhexdhexaad ah (semi-concessional terms) oo loogu talagalay maalgelinta mashaariicda muhiim u ah Dalka, si loo daboolo baahiyaha horumarineed iyadoo la ilaalinayo xasilloonida maaliyadeed.

Iyadoo lagu saleynayo qiimeynta natiijooyinka ka dhalan kara haddii la dhaqan-geliyo Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha, isla markaana lala jaan-qaadayo yoolalka Dowladda ee maaraynta deymaha, Istiraatiijiyadda 1-aad ayaa loo doortay inay noqoto istiraatiijiyadda la doorbidayo. Istiraatiijiyaddan 1-aad waxay yareyneysaa halista, iyadoo sidoo kale ilaalinaysa jiritaanka shuruudaha deeqsiga ah ee lagu saleeyay deymaha hadda jira.

Istiraatijiyadaha 2-aad iyo 4-aad waxay suurtogal ka dhigayaan in ilaha amaahda si tartiib tartiib ah loo ballaariyo, iyada oo la isku darayo amaah leh shuruudo deeqsi ah (concessional) iyo kuwo leh shuruudo qayb ahaan deeqsi ah (semi-concessional). In kasta oo istiraatijiyadahan ay kordhin karaan kharashka iyo waajibaadka maaliyadeed ee Dowladda, haddana waa kuwo la maamuli karo. Hirgelintooda waxa lagu salayn karaa horumarka kaabayaasha dhaqaalaha iyo mashaariicda horumarineed ee muhiimka ah, iyadoo sidoo kale la tixgelinayo suurtogalnimada in heshiisyada mustaqbalka ee Soomaaliya iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka ay wax ka beddelaan ama meesha ka saaraan xaddidaadaha ku saabsan nuucyada deymaha la qaadan karo.

Istiraatijiyadda 3-aad waxay aad ugu dhowdahay Istiraatijiyadda 1-aad, balse waxay ku darsatay hirgelinta hannaan muddo-gaaban ah oo deyn gudaha lagu qaadanayo labada sano ee ugu dambeysa muddada Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS). Tani waxay ka qayb qaadan kartaa horumarinta iyo kobcinta suuqyada gudaha ee deymaha. Hasayeeshe, hirgelinteeda waxay si weyn ugu xirnaan doontaa guulaha laga gaaro dhaqan-gelinta Nidaamka Maareynta Sarrifka Sugan ee Shilin Soomaaliga cusub (Currency Board), kaas oo saldhig u noqonaya xasilloonida guud ee dhaqaalaha iyo maaliyadda Dalka.

Qaybta 2-aad: Horudhac

A. Xaaladdaha Keenay Dejinta Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS)

Taariikhdu markay ahayd 13-kii December 2023, Soomaaliya waxay ka gaartay guul istiraatiiji ah geedi-socod dheer oo socday, iyada oo si rasmi ah u dhammeystirtay Barnaamijka Dayn Cafinta ee Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (HIPC), taasoo ka dhigtay dalka 37-aad ee si buuxda u dhammaystiray barnaamijkan. Guushan taariikhiga ah ayaa si weyn u dhintay wadarta deynta dibadda ee Dalka lagu lahaa, iyadoo wadarta guud ee deynta dibadda ee Soomaaliya ee ahayd 64% ee wax-soo-saarka guud (GDP) sanadkii 2018 hoos ugu dhigtay ku dhawaad 8% dhammaadkii sanadkii 2024.

Hadda oo la joogo, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay sii wadaa wada-hadallada iyo la-tashiyada ay la leedahay deyn-bixiyeyaasha aan ka tirsanayn Naadiga Paris (Paris Club) iyo hay'adaha maaliyadda caalamiga ah, si loo fuliyo qodobbadii lagu heshiiyey dhamaadkii Barnaamijka Dayn Cafinta ee Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (HIPC). Tusaale ahaan, waxaa mudan in la xuso in Dowladda Federaalka ay la gaartay heshiis deyn xallin oo laba-geesood ah Dowladda Abu Dhabi ee Imaaraadka Carabta, kaasoo qeyb ka noqday xoojinta guulihii hore ee laga gaaray dhimista deymaha dibadda ee Soomaaliya lagu lahaa.

Intaa waxaa dheer, Dowladda Federaalka ayaa 9-kii Abriil 2025 ku heshiiysay dib-u-habeyn ku saabsan daynta Sanduuqa Lacagta Carabta. Heshiiskan, oo si buuxda ula jaanqaadaya habraaca Barnaamijka Dayn Cafinta Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (HIPC), ayaa xaqiijiyay in 56.4% la dhimo daynta Sanduuqa Lacagta Carabtu ku lahaa Soomaaliya.

Dayn cafiska ay Soomaaliya heshay ka dib markii ay ku guulaysatay Barnaamijka Dayn Cafinta ee Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (HIPC) ayaa si weyn u yareeyay culeyska deymaha Dalka, isla markaana ka qayb qaatay xasilloonida muddada-dheer ee deymaha Dalka. Intaa waxaa dheer, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si firfircoon u sii wadda dadaallada dib-u-habeynta dhaqaalaha iyo maaliyadda Dalka, iyadoo sidoo kale ka shaqaynaysa fulinta waajibaadkeeda caalamiga ah, oo ay ka mid tahay hirgelinta Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka. Waxaa xusid mudan in guulahaas iyo dadaalladaas awgood, dhaqaalaha dalku muujinaayo koboc wanaagsan, iyadoo heerka wax-soo-saarka gudaha (GDP) lagu qiyaasay inuu ka kori doono 3% sanadka 2025, isla markaana gaari doono 4% sanadka 2029.

Haddaba, iyadoo laga duulaayo arrimaha kor lagu soo sheegay, lana raacayo Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo Saarista Dammaanaddaha ee 2024, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa diyaarisay Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS). Istiraatiijiyaddan waxaa loogu talagalay in mar kale lagu adkeeyo ballanqaadka Dowladda ee ku aaddan xasilloonida dhaqaalaha guud, xoojinta awoodda iyo hannaanka hay'adaha maaliyadeed, iyo kor u qaadista horumarka waara ee Dalka.

B. Ujeeddooyinka iyo Hab-raaca

Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) waxay dejinaysaa jihada guud iyo xayndaabka siyaasadeed ee hagaya go'aannada Dowladda Federaalka ee ku saabsan qaadashada deymaha inta lagu jiro muddada dhexe. Istiraatiijiyaddan waxaa loo diyaariyey iyadoo la raacayo Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo Saarista Dammaanaddaha ee 2024. Qodobka 2-aad ee Xeer-nidaamiyahaas wuxuu si cad u qeexayaa ujeeddooyinka aasaasiga ah ee siyaasadda deymaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuwaas oo kala ah:

- In la hubiyo in baahiyaha maaliyadeed ee muddada-dhexe iyo muddada fogba ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lagu daboolo si habboon oo ku beegan waqtigooda.

- In la yareeyo kharashaadka la xiriira deymaha, iyadoo la hubinayo in heerka khataraha maaliyadeed lagu hayo xad ammaan ah oo si taxadar leh loo maareyn karo.

- In la dhiirrigeliyo kobaca iyo horumarinta suuqyada maaliyadeed ee gudaha marka ay xaaladaha dhaqaale ee guud u saamaxaan Dowladda.

Sidaa darteed, iyadoo la raacayo Qodobka 2-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo Saarista Dammaanaddaha ee 2024, mabaadi'da aasaasiga ah ee hagaya maaraynta deymaha ee lagu qeexayo Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS) waa kuwan soo socda:

- In mudnaanta la siiyo amaahda dibadda ee deeqsiga ah (highly concessional), si loo maalgeliyo mashaariicda mudnaanta u leh horumarka Dalka, iyadoo la hubinayo in deymaha la soo qaadayo ay la jaanqaadayaan xaaladda dhaqaale ee Dalka, lana xaqiijinayo in deymaha Dowladdu ay yihiin kuwo si waara loo maarayn karo.

- In sanadaha dambe ee Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha la qiimeeyo suurtagalnimada iyo qaababka lagu horumarin karo suuqyada gudaha ee daymaha, iyadoo lala jaanqaadaayo dhaqan-gelinta Nidaamka Maareynta Sarrifka Sugan ee Shilin Soomaaliga cusub (Currency Board), si loo xoojiyo xasilloonida Shilin Soomaaliga iyo kalsoonida suuqyada maaliyadeed.

- In la qiimeeyo saameynta ay leeyihiin ilo cusub oo lacag laga amaahan karo, kuwaas oo leh shuruudo deeqsi ah oo hooseeya, iyadoo loo adeegsanayo mashaariicda horumarineed oo muhiim u ah Dalka muddada dhexe, lana hubinayo in deymahaas ay u hoggaansamaan shuruudaha deeqsinimada ee ku habboon (appropriate concessional terms).

Si looga miro dhaliyo mabaadi'daas, Waaxda Maareynta Deymaha ee Wasaaradda Maaliyadda waxaa loo xilsaaray diyaarinta iyo cusbooneysiinta joogtada ah ee Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), iyadoo la

cusbooneysiinayo ugu yaraan hal mar sanadkii, waxayna talooyinka ka soo baxa Istiraatiijiyaddan hagayaan diyaarinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka, kaas oo lala ansixinayo sharciga qoondada miisaaniyadda sanadlaha ah ee Dowladda.

Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) waxay ku dhisan tahay hannaanka dhaqaale iyo maaliyadeed ee ay Dowladda Federaalka Soomaaliya diyaarisay, kaas oo lagula heshiiyey Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) intii lagu guda jiray dib-u-eegistii afraad ee Barnaamijka Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF), taas oo la soo gebogebeeyey bishii Sebtembar 2025. Xogta deymaha guud ee loo adeegsaday falanqaynta waxay ka timid deymaha aan weli la bixin ee ku jiray diiwaannada Dowladda dhammaadka sanadkii 2024, iyadoo la waafajiyay horumarradii muhiimka ahaa ee la sameeyey sannadkaan 2025, oo ay ku jirto dhameystirka heshiisyadii laba-geesoodka ahaa ee dib-u-habeynta deymaha. Sidoo kale, falanqaynta ku jirta Istiraatiijiyaddan waxaa la sameeyey iyadoo la adeegsanayo Habraaca Falanqaynta Istiraatiijiyadaha Deymaha oo ay diyaariyeen Sanduuqa Lacagta Adduunka iyo Bangiga Adduunka (MTDS Analytical Tool), taas oo xaqiijinaysa in go’aamada lagu saleeyo xog la isku halleyn karo oo waafaqsan habraacyada iyo heerarka caalamiga ah ee maaraynta deymaha.

Qaybta 3-aad: Hannaanka Dhaqaale iyo Maaliyadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Dhaqaalaha guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa si tartiib tartiib ah u soo hagaagaya, iyadoo ay taageerayaan arrimo muhiim ah oo ay ugu waaweyn yihiin dadaallada joogtada ah ee dib-u-habeynta dhaqaalaha ee ay hoggaaminayso Dowladda Federaalka Soomaaliya, guulihii laga gaaray barnaamijkii dayn cafiska, iyo xiriirka wanaagsan ee Dowladdu la leedahay deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah. Iyada oo arrimahaas la soo sheegay ay saldhig u yihiin, waxaa la filayaa in heerka kororka wax-soo-saarka gudaha ee dhabta ah (GDP) uu gaaro 3.0% dhammaadka sanadka 2025, halka la rajeynayo in kobocan dhaqaale uu sii kordho oo uu gaaro 4.0% sanadka 2029. Kobacaan dhaqaale wuxuu ka tarjumayaa kalsooni sare oo ka dhalatay dhammaystirkii barnaamijkii dayn cafiska bishii Diseembar 2023, kororka baahida gudaha ee loo qabo badeecadaha iyo adeegyada, iyo soo kabashada sii xoogeysanaysa ee beeraha iyo ganacsiyada bixiya adeegyada, ka dib abaarihii saamaynta weyn yeeshay ee dhacay sanadihii 2021–2022.

Waxaa la filayaa in sicir-bararka uu hoos ugu dhaco 3.6% dhammaadka sanadka 2025, marka loo eego heerkii uu joogay sanadkii 2024 oo ahaa 5.5%, isla markaana uu sii xasilli doono muddada dhexe. Xasilloonida sicir-bararku waxay si gaar ah ugu saleysan tahay kororka ku yimid raashinka iyo cuntada Dalka laga heli karo. Waxaa xusid mudan in, maadaama dhaqaalaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu si weyn ugu saleysan yahay doolarka Maraykanka, isla markaana aanu jirin suuq deymeed gudaha ah oo shaqeynaya, saameynta tooska ah ee isbeddelada sicir-bararku ku yeelan karaan kharashka la xiriira dib-u-bixinta deymaha guud ay aad u kooban tahay. Arrintan waxaa sabab u ah in gebi ahaanba deymaha guud ay yihiin kuwo dibedda laga leeyahay, heerka kharashka maalgelintoodana (financing cost) uu go’an yahay, isla markaana shuruudahoodu yihiin kuwo deeqsi ah (concessional in nature).

Marka ay timaado dhanka maaraynta maaliyadda guud, waxaa si la taaban karo u soo hagaagay dadaallada ururinta dakhliga gudaha, kuwaasoo ay taageerayaan horumarka lagu wado hannaanka sharci iyo siyaasadeed ee canshuuraha iyo xoojinta maamulka dakhliga. Tusaale ahaan, waxaa la filayaa in Sharciga Canshuurta Dakhliga ee la meel-mariyay sanadkan 2025, kaasoo ballaariyay baaxadda shakhsiyaadka canshuuruhu ku waajibeen, uu kor u qaadi doono dakhliga muddada dhexe. Muddada dhow waxaa sii socon doona taageerada deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah ee loogu talagalay taageerada miisaaniyadda iyo maalgelinta mashaariicda horumarineed, iyagoo kaabaya dadaallada Dowladda ee kor loogu qaadayo dakhliga gudaha isla markaana taageeraya himilooyinka horumarineed ee mudnaanta u leh Dalka ee ku jira Qorshaha Isbadalka Qaranka iyo Qorshaha Hiigsiga Qarni-jirka 2060.

Hase yeeshee, maadaama lagu qiimeeyay in heerka halista ee la xiriira cadaadiska deymaha (risk of debt distress) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu yahay mid dhexdhexaad ah, waxaa loo arkayaa in dalku uusan u sii qalmin helista deeqaha (grants) Bankiga Adduunka, sida ku cad shuruudaha maalgelinta ee barnaamijka IDA20 ee Bankiga Adduunka. Iyadoo arrintaas la tixgelinayo, muddada ay Soomaaliya sii heli karto deeqaha Bankiga Adduunka ayaa la kordhiyay, waxaana la gaarsiiyay dhammaadka bisha Juun 2028, iyadoo lagu sameyn doono dib-u-eegis sannadle ah si loo xaqiijiyo in Dalku uu weli usii qalmo helitaanka deeqahaas. Sidaas

darteed, marka la gaaro dhammaadka Juun 2028, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ma heli doonto deeqo cusub oo ka yimaada Bankiga Adduunka, waxaana looga baahan yahay inay baahideeda maaliyadeed ku maareyso iyada oo adeegsanaysa amaahyo iyo fursadaha kale ee maaliyadeed ee u furan.

Iyadoo laga jawaabayo xaaladdaas, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay ku ballanqaaday Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee ay la gashay Sanduuqa Lacagta Adduunka, in ay si adag oo daahfurn u xakameyn doonto baahideeda maaliyadeed. Sidaa darteed, is-dhinka maaliyadeed ee saameeynta kuleh miisaaniyadda waxaa lagu ilaalinayaa heer ka hooseeya 3.5% ee wax-soo-saarka guud ee Dalka (GDP), waxaana is-dhinkaas laga maalgelinayaa iyadoo la adeegsanayo amaahyo shuruudahoodu deeqsi yahay (concessional loans). Taas awgeed, amaah aan ka yarayn 1.5% ee wax-soo-saarka guud ee Dalka (GDP) waa in laga helaa deyn-bixiyeyaasha caalamiga ah ee bixiya amaahda deeqsiga ah (highly concessional) (taas oo ugu yaraan 50% ay tahay deeq), iyo taageeroooyinka farsamo ee lagu horumariyo awoodda hay'adaha dowladda iyo nidaamyada maamulka maaliyadda guud.

Dhanka dibadda, marka la eego lacagaha Dalka soo gala iyo kuwa ka baxa, Soomaaliya waxay kharash garaysaa lacag ka badan tan ay ka hesho dhoofinta badeecooyinka, lacagaha dibadda laga soo diro (remittances), iyo taageerada caalamiga ah. Waxaa la filayaa in dheelitir la'aanta u dhexeysa lacagaha soo gala iyo kuwa ka baxa Dalka ay yara ballaaran doonto, ka hor inta aysan ku xasillin muddada dhexe ku dhawaad 10% ee wax-soo-saarka guud ee Dalka (GDP). Inta lagu jiro muddadaan, deeqaha lacageed ee dibadda ayaa hoos u dhici doona, iyadoo lacagaha dibadda laga soo diro ay ku sii ekaan doonaan heerka ay maanta joogan, halka heerka dhoofinta badeecadaha Dalka ay si tartiib tartiib ah u hagaagi doonto. Waxaa mudan in la xuso in lacagahan dibadda laga soo diro ayaa sii ahaan doonan il muhiim ah ee lacagaha qalaad ah ee Dalka soo gala (ku dhawaad in ka badan 20% ee wax-soo-saarka guud ee Dalka), kuwaas oo gacan ka geysta kor u qaadista awoodda kharashaadka reeraha iyo helitaanka lacagaha qalaad ee loo baahan yahay. Isku darka lacagahan dibadda laga soo diro, deeqaha maaliyadeed ee rasmiga ah, iyo soo kabashada dhoofinta badeecooyinka Dalka ayaa gacan ka geysanaya adkeysiga guud ee dhaqaalaha Dalka, gaar ahaan qaybaha ku tiirsan lacagaha qalaad ee dibadda.

Maadaama dhaqaalaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu si weyn ugu tiirsan yahay doolarka Maraykanka, halista ka imaan karta isbeddelada ku dhaca qiimaha sarrifka waa mid aad u yar oo aan saameyn taban ku lahayn dadaallada lagu xaqiijinayo in deymaha Dowladda ay sii ahaadaan kuwo si waara loo maarayn karo. Intaa waxaa dheer, isbeddelka qiimaha sarrifka wax saameyn ah kuma yeesho kharashka la xiriira dib-u-bixinta deymaha guud, maadaama ku dhawaad dhammaan deymaha Dalka ay ku xisaabsanyihiin doolarka Maraykanka ama lacago kale ee ku xiran doolarka Maraykanka.

Jadwalka 1-aad. Masawirka Guud ee Dhaqaale iyo Maaliyadeed ee Dalka (% ee GDP-ga)

	2024	2025	2026	2027	2028	2029
Miisaaniyadda iyo Dhaqaalaha: 2024–2029						
A: Dhaqaalaha iyo Sicirka *(Income and Prices)*						
Kororka dhabta ah ee GDP-da *(Real GDP growth)*	4.1%	3.0%	3.3%	3.6%	3.8%	4.0%
Sicir-bararka *(Inflation)*	5.5%	3.6%	3.5%	3.4%	3.2%	3.0%
B. Dhaqdhaqaaqa Maaliyadeed *(Fiscal dynamics)*						
Dakhliga iyo Deeqaha *(Revenue & Grants)*	7.5%	7.2%	6.7%	6.5%	5.9%	5.4%
Kharashaadka guud oo ay ku jiraan kharashka maalgelinta la qorsheeyay *(Total expenditures including budgeted financing cost payments)*	7.4%	7.5%	7.4%	7.2%	7.2%	7.4%
Kharashka maalgelinta la qorsheeyay *(Budgeted financing cost payments)*	0.0%	0.1%	0.1%	0.1%	0.1%	0.1%
Miisaaniyadda aasaasiga ah *(Primary fiscal balance)*	0.1%	-0.2%	-0.6%	-0.6%	-1.2%	-1.9%
Miisaaniyadda guud (Overall fiscal balance)	-0.1%	-0.3%	-0.7%	-0.7%	-1.3%	-2.0%
C. Dhaqdhaqaaqa Dibadda *(External dynamics)*						
Dheellitirka Koontada Guud ee Ganacsiga iyo Dakhliga Dalka *(Current account balance)*	-8.2%	-9.5%	-8.6%	-8.3%	-9.7%	-10.5%
Lacagaha dibadda laga soo diro *(Remittances)*	19.8%	19.2%	19.9%	20.4%	20.3%	20.0%
Kaydka Lacagaha Caalamiga ah (IR, USD Million)	211	211	209	205	197	176
Isha Xogta: Sanduuqa Lacagta Adduunka (Sebtembar 2025)						

Qaybta 4-aad: Falanqaynta Deymaha Hadda Jira

A. Xaaladda Deymaha Hadda Jira ee Dhammaadkii Sanadka 2024

Xaaladda ay hadda ku suganyihiin deymaha guud ee Soomaaliya waxay ka tarjumaysaa natiijadii ka dhalatay dhimistii deymaha ee laga helay Barnaamijka Dayn Cafinta ee Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (HIPC), iyadoo deymaha haray lagu sifeyn karo kuwo khatartoodu hooseyso marka loo eego awoodda bixinta ee Dowladda, iyo in ay yihiin kuwo si waara loo maarayn karo. Dhammaadkii sanadka 2024, wadarta guud ee deymaha wali ku harsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay gaareysay $957.99 milyan oo doolarka Maraykanka ah, dhammaantoodna waa deymo dibadda laga leeyahay, maadaama Dowladdu aanay weli wax deyn ah ka qaadan gudaha Dalka.

Tirada deymaha hadda jira ee looga hadlay faqradda sare waxaa ku jira qadarka uu Sanduuqa Lacagta Carabta ku lahaa Soomaaliya, kaas oo si rasmi ah dib loogu jadwaleeyay rubicii 1-aad ee sanadka 2025, waxaana uu gaarayay $202.20 milyan oo doolarka Maraykanka ah. Si kastaba ha ahaatee, qadarkan maahan mid ay ku jiraan deymaha waqtigooda ka dib dhacay (arrears). Sidoo kale, ma ahan mid ay ku jiraan deymaha ay Dowladdu dammaanad qaaday, maadaama aysan jirin wax deymo ah oo ay qaateen shirkadaha ay Dowladdu leedahay, dowladaha hoose, ama mashaariicda iskaashiga dheef-wadaagga ah (PPPs).

Waxaa mudan in la xuso in tilmaamayaasha muhiimka ah ee lagu cabbiro deymaha ay muujinayaan in heerka deymaha Dalka uu hooseeyo, isla markaana aanu ahayn culeys aan la maareyn karin. Tusaale ahaan, dhammaadkii sanadka 2024, wadarta guud ee saamiga deymuhu ka ahaayeen wax-soo-saarka gudaha (GDP) waxay gaareysay 7.9%, halka marka la tixgeliyo shuruudaha deeqsiga ah (highly concessional) ee lagu dabaqay, deymahaas ay ka noqdeen 4.8% wax-soo-saarka gudaha, taasoo si weyn uga hooseysa xadadka loo arko inaysan khatar ku ahayn maaliyadda guud.

Marka loo eego inta badan dalalka ku yaalla qaaradda Afrika, deynta dibadda ee Soomaaliya waa mid si fudud loo maamuli karo, maadaama ay jiraan heshiisyo deyn oo kooban oo shuruudahoodu fudud yihiin. Inta badan deymaha Soomaaliya lagu leeyahay waa kuwo laba-geesood ah, waxayna ka yimaadeen dowlado kala duwan, kuwaasoo wadar ahaan leh 63.7% wadarta guud ee deymaha haray. Deyn-bixiyeyaasha caalamiga ah ayaa iyaguna leh 27.3% wadarta guud ee deymaha, waxaana ka mid ah Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) oo kaligiis leh 9.1% wadarta guud ee deymaha ku haray Dalka.

Jaantuska 1-aad. Kala-soocidda deymaha dibadda ee harsan iyadoo loo eegayo deyn-bixiyayaasha, si waafaqsan dhammaadka sanadkii 2024



Isha Xogta: Wasaaradda Maaliyadda

Inta badan deymaha dibadda looga leeyahay Soomaaliya waxay leeyihiin shuruudo aad u deeqsi ah (highly concessional). Celcelis ahaan, waxay qaadanayaan 21.9 sano in la bixiyo, iyadoo qaddar dhan 0.2% oo kaliya ee deynta ah la bixin doono sannad gudahiis. Dhammaan deymuhu waxay leeyihiin kharash maalgelin (financing cost) go'an, iyadoo celceliska kharashka maalgelinta (financing cost) yahay oo kaliya 0.5%, taasoo muujinaysa shuruudaha wanaagsan ee Soomaaliya ku heshay taageerada dalalka saaxiibaa ah iyo hay'adaha caalamiga ah.

Dhammaan deymaha dibadda looga leeyahay Soomaaliya waxaa lagu qaatay lacago qalaad. Deymaha intooda badan waxay ku xisaabsanyihiin dhowr lacagood oo qalaad, iyadoo qaybta ugu weyn ay tahay Dirham-ka Imaaraadka Carabta (AED) oo gaaraya 36.1%, kaas oo ay ku xigaan Riyal-ka Sacuudiga (SAR) oo ah 23.0%, Dinar-ka Xisaabaadka Carabta (AAD) oo ah 21.1%, iyo Lacagta Caalamiga ah ee Sanduuqa Lacagta Adduunka (SDR) oo ah 9.2%. Qaybo yar oo ka mid ah deymaha ayaa ku xisaabsan lacagaha soo socda: Doolarka Maraykanka (USD) oo ah 4.5%, Dinar-ka Kuwait (KWD) oo ah 3.9%, iyo Dinar-ka Islaamiga ah ee Bangiga Horumarinta Islaamka (IDB) oo ah 2.1%. Arrintan waxay muujinaysaa in inta badan deymaha dibadda looga leeyahay Soomaaliya ay ku urursan yihiin dhowr lacagood oo keliya, taas oo ka dhigaysa maaraynta iyo dib-u-bixinta mid la saadaalin karo isla markaana khatarteedu hooseyso.

Jaantuska 2-aad. Kala-soocidda deymaha dibadda ee harsan iyadoo loo eegayo lacagaha ay ku xisaabsan yihiin, si waafaqsan dhammaadka sanadkii 2024



Isha Xogta: Wasaaradda Maaliyadda

B. Falanqaynta kharashka iyo halista ee deynta hadda jirta ee Soomaaliya

Jadwalka 2-aad. Tilmaamayaasha kharashka iyo halista deynta hadda jirta, si waafaqsan dhammaadka sanadkii 2024

Tilmaamaha Khatarta *(Risk Indicators)*		**Deynta Dibadda** *(External debt)*	**Deynta Gudaha** *(Domestic debt)*	**Deynta Guud** *(Total debt)*
Qaddarka lacagta *(Amount - SOS million)*		550,842.4	0.0	550,842.4
Qaddarka lacagta *(Amount - USD million)*		958.0	0.0	958.0
Deymaha magac ahaan dalku qabo *(Nominal debt - % GDP)*		7.9	0.0	7.9
Qiimaha hadda ee deymaha dalku qabo *(PV of debt - % GDP)*		4.8	0.0	4.8
Kharashka Deynta *(Cost of debt)*	Lacagaha kharashka maalgelinta *(financing cost payment - % GDP)*	0.0	0.0	0.0
	Celceliska boqolleeyda kharashka maalgelinta *(Weighted average financing cost - percent)*	0.5	0.0	0.5
Khatarta Dib-u-maalgelinta *(Refinancing risk)*	Celceliska Waqtiga Dayn-bixinta *(ATM - years)*	21.9	0.0	21.9
	Boqolleeyda guud ee deynta la filayo in la bixiyo hal sano gudihiis *(Debt maturing in 1 year – % of total)*	0.2	0.0	0.2
	Boqolleeyda deynta lagu bixinayo hal sano gudihiis marka loo eego GDP-ga *(Debt maturing in 1 year – % of GDP)*	0.0	0.0	0.0
Khatarta Heerka Kharashka Maalgelinta *(Financing Cost)*	Celceliska Waqtiga Dib-u-dejinta Kharashka Maalgelinta *(ATR – years)*	21.9	0.0	21.9

	Boqolleeyda deymaha kharashkooda maalgelinta dib-loogu dejinayo hal sano gudihiis *(Debt refixing in 1yr - % of total)*	0.2	0.0	0.2
	Boqolleeyda deymaha kharashkooda maalgelinta uu go'an yahay oo ay ku jiraan dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda *(Fixed rate debt incl. T-bills - % of total)*	100.0	0.0	100.0
	Boqolleeyda dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda ee ka mid ah guud ahaan deymaha Dalka *(T-bills - % of total)*	0.0	0.0	0.0
Khatarta Isbeddelka Sicirka Lacagaha Qalaad *(FX risk)*	Boqolleeyda deymaha ku xisaabsan lacagaha qalaad ee ka mid ah guud ahaan deymaha Dalka *(FX debt - % of total debt)*	-	-	100.0
	Boqolleeyda deymaha muddada-gaaban ee ku xisaabsan lacagaha qalaad marka loo eego kaydka lacagaha qalaad ee Dalka *(ST FX debt - % of reserves)*	-	-	0.82

1. Khatarta Dib-u-Maalgelineed (Refinancing Risk)

Deynta guud ee lagu leeyahay Soomaaliya waxaa lagu qiimeeyay inay leedahay khatar dib-u-maalgelineed (oo ah khatarta in aan loo heli karin deyn cusub si loogu bixiyo deyntii hore) oo aad u hooseysa, maadaama inta badan deymaha hadda jira ay yihiin kuwa muddada dheer ah oo lagu bixiyay shuruudo deeqsi ah (concessional terms), taasoo micnaheedu yahay in ay leeyihiin kharash maalgelin (financing cost) hooseeya iyo muddo dib-u-bixin oo dheer. Celcelis ahaan, muddada ay qaadanayso in deymahaas si buuxda loo bixiyo waa 21.9 sano, halka qaar ka mid ah deymahaas ay sii jiri doonaan muddo gaaraysa ilaa 39 sano ka hor inta aan gebi ahaanba la bixin. Hase yeeshee, waxaa la filayaa in sanadka 2029 uu jiri doono cadaadis dhexdhexaad ah oo la xiriira dib-u-bixinta deymaha, taas oo inta badan ka dhalan doonta dib-u-bixinta la qorsheeyay ee deymaha Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) iyo bixinta kharashka maalgelinta (financing cost) ee ururay ee deymaha dowladaha kale.

Jaantuska 3-aad. Qaabka bixinta deynta, oo waafaqsan dhammaadka sanadkii 2024 (oo ah malaayiin doolarka Mareykan ah)



Isha Xogta: Wasaaradda Maaliyadda

Guud ahaan, sifooyinkani waxay muujinayaan in jadwalka dib-u-bixinta deynta ee Soomaaliya uu si wanaagsan u kala fidsan yahay, taasoo ka dhigan in lacag-bixinnada ku dhacaya muddada gaaban iyo tan dhexe ay aad u yar yihiin, isla markaana aan loo baahnayn in la qaato amaah cusub si loo daboolo waajibaadkaas. Intaa waxaa dheer, maadaama Soomaaliya aysan weli qaadan deyn gudaha ah oo muddo-gaaban, ma jirto khatar la taaban karo oo la xiriirta dib-u-bixinta deymaha muddada gaaban, taas oo si weyn u yaraynaysa cadaadiska ku imaan kara qorshaynta iyo maaraynta guud ee deymaha qaranka.

2. Khatarta Heerka Kharashka Maalgelinta (Financing Cost)

Khatarta ka dhalan karta isbeddelada heerka kharashka maalgelinta (financing cost) waa mid aad u hooseysa marka la eego deymaha Soomaaliya. Sababta ayaa ah in dhammaan deymaha Dalka ay yihiin kuwo leh kharash maalgelin (financing cost) oo go’an, taasoo macnaheedu yahay in kharashka maalgelinta (financing cost) ee la bixinayo uusan waqti ka dib isbeddelayn. Maadaama aanay jirin deymo leh kharash maalgelin (financing cost) isbed-bedelaya, Soomaaliya uma nugla isbeddelada heerarka kharashka maalgelinta (financing cost) ee caalamiga ah ama goboleedka, taasoo ka dhigaysa kharashka la xiriira dib-u-bixinta deymaha mid xasiloon oo la saadaalin karo. Sidaas darteed, xaaladda hadda jirta waxay muujinaysaa in deymaha Soomaaliya ay yihiin kuwo aan u nugulayn isbeddelada heerka kharashka maalgelinta (financing cost), taasoo yareyneysa hubanti la’aanta maamulka deymaha.

3. Khataraha Lacagaha iyo Sicirka Sarrifka

Khataraha Soomaaliya kaga imaan kara isbeddelada qiimaha lacagaha iyo sicirka sarrifka waa kuwo aad u hooseeya. Sababta ugu weyn ayaa ah in dhaqaalaha Dalka uu si xooggan ugu tiirsan yahay doolarka Mareykanka—inkastoo shilin Soomaaligu yahay lacagta rasmiga ah, haddana inta badan ganacsiga, kaydinta lacagaha, iyo bixinta deymaha waxaa lagu sameeyaa doolarka Mareykanka. Intaa waxaa dheer, dirhamka Imaaraatka Carabta (AED) iyo riyaalka Sacuudiga (SAR) labaduba waxay si toos ah ugu xiran yihiin doolarka Mareykanka, taasoo sii yaraynaysa khatarta ka dhalan karta isbeddelada sicirka sarrifka. Inkastoo dinarka Kuwait (KWD) aanu si

toos ah ugu xirnayn doolarka Mareykanka, haddana waxa uu ku xiran yahay koox lacageed (basket of currencies) oo uu ku jiro doolarka Mareykanka, taasoo ka dhigaysa khatarta isbeddelka sicirka sarrifka ee deynta ku xiisaabsan dinarka Kuwait (KWD) mid aad u yar.

Qaybta 5-aad: Qiimeynta Xalalka iyo Ilaha Suurtagalka ah ee Maalgelinta iyo Deymaha

Kadib markii si guul leh loo dhameystiray Barnaamijka Dayn Cafinta ee Dalalka Saboolka ah ee Deymuhu Ragaadiyeen (HIPC), Soomaaliya waxay xoojisay xiriirrada adag ee ay la leedahay Hay'adaha Maaliyadeed ee Caalamiga ah (IFIs), iyadoo sidoo kalena kor u qaaday sumcadda ay ku dhex leedahay amaah-bixiyeyaasha caalamka. Guushan taariikhiga ah ayaa si ballaaran u kordhisay awoodda Soomaaliya ay ku heli karto maalgelin leh shuruudo deeqsi ah (concessional financing), taasoo ka timaada hay'adaha maaliyadeed ee caalamiga ah iyo dalalka saaxiibada ah. Maalgelintan waxaa loo adeegsan karaa in lagu taageero kobaca guud ee dhaqaalaha, lagu maalgeliyo mashaariicda kaabayaasha istiraatiijiga ah, iyo in lagu xoojiyo dadaallada lagu dhimayo faqriga. Sidaa darteed, hay'adaha muhiimka ah sida Sanduuqa Lacagta Adduunka, Bangiga Adduunka, iyo Bangiga Horumarinta Afrika, iyo sidoo kale dalalka dayn-bixiyeyaasha ah, ayaa hadda awood u leh inay Soomaaliya siiyaan taageero dhaqaale oo leh shuruudo deeqsi oo ka badan kuwii hore, taasoo sare u qaadaysa kalsoonida iyo awoodda Dalka ee maaraynta maaliyaddiisa iyo deymaha mustaqbalka.

Haddana, inkastoo horumar la taaban karo laga gaaray helitaanka maalgelin iyo amaah leh shuruudo deeqsi ah, iyo sidoo kale xoojinta xiriirka Soomaaliya ee hay'adaha maaliyadeed ee caalamiga ah, haddana istiraatiijiyadda hadda jirta ee amaahda iyo maalgelinta Dalka weli waxaa xaddidaya shuruudaha lagu qeexay Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka. Xaddidaadahan ayaa dejinaya saqaf qeexan oo ku saabsan heerka amaahda ay Dawladdu qaadan karto, ha ahaato mid ka timaadda ilo dibedda ah ama kuwo gudaha Dalka ah. Xaddidaadyadan saaran amaahda ayaa si taxadar leh loo tixgeliyey intii lagu guda jiray diyaarinta Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), si loo hubiyo in maamulka deymaha uu ahaado mid waara, islamarkaana ku dhexjira xadadka lagula heshiiyay hay'adaha caalamiga ah ee taageera Dalka.

A. Xaddidaadaha Saaran Amaahda Dibadeed ee aan Lahayn Shuruuddaha Deeqsiga ah (Non-concessional Loans)

Iyadoo la raacayo shuruudaha Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka, Soomaaliya looma oggola inay qaadato amaah dibadeed oo aan lahayn shuruudo deeqsi ah (non-concessional loans), sida ku cad Shuruudaha Waxqabadka Maaliyadeed ee la Cabbiri Karo (Quantitative Performance Criteria). Sida ay dhigayaan xeerarka Sanduuqa Lacagta Adduunka, amaah kasta oo leh qayb deeqeed (grant element) ka yar 35% waxaa loo tixgelinayaa inay tahay amaah aan lahayn shuruudo deeqsi ah. Sidaa darteed, amaahda noocan ah waa la xaddiday inta lagu guda jiro muddada Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka.

Inkastoo xadkaan hadda saaran amaahda uu yahay mid waajib ah, waxaa suuragal ah in heshiisyada mustaqbalka ee Soomaaliya iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka ay wax ka beddelaan ama meesha ka saaraan xaddidkan. Marka xaalad noocaan ah la gaaro, Soomaaliya waxay qaadan kartaa amaah dibadeed aan lahayn shuruudo deeqsi ah ee buuxa (semi-concessional loans), tusaale ahaan amaah leh qayb deeqeed inyar ka

hoseeysa 35 boqolkiiba, si si gaar ah loogu maalgeliyo mashaariicda horumarineed iyo kaabayaasha istiraatiijiga ah. Rajooyinkan ayaa muujinaya fursadaha kala duwan ee maalgelinta dibedda ee suurtagalka u ah Soomaaliya, kuwaas oo laga faa'iidaysan karo muddada dhexe ilaa muddada fog.

Go'aanka Soomaaliya ee ah in aanay qaadan wax amaah ah oo aan lahayn shuruudo deeqsi ah (non-concessional loans) wuxuu sidoo kale qayb ka yahay siyaasadda iyo shuruudaha looga baahan yahay Soomaaliya inay u hoggaansanto, kuwaas oo si cad loogu qeexay Siyaasadda Maalgelinta Horumarka Waara ee Bankiga Adduunka (IDA Sustainable Development Financing Policy). Taas micnaheedu waa in Soomaaliya looga baahan yahay inay qaadato oo keliya amaah leh shuruudo deeqsi ah—sida amaah leh kharash maalgelin (financing cost) oo hoose, muddo dib-u-bixin dheer, oo qayb kamid ahna ay tahay deeq—si loo hubiyo in maamulka deymaha uu ahaado mid waara, isla markaana looga hortago in Dalka uu galo culaysyo dhaqaale oo mustaqbalka saamayn taban ku yeelan kara.

B. Xaddidaadaha Saaran Qaadashada Amaahda Gudaha (Domestic Debt Issuances)

Si waafaqsan Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Soomaaliya iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka, Soomaaliya waxaa sidoo kale laga xaddiday qaadashada deymaha cusub ee gudaha. Xadkaan wuxuu qayb ka yahay Shuruudaha Waxqabadka Maaliyadeed ee la Cabbiri Karo (Quantitative Performance Criteria), wuxuuna waajibinayaa in Soomaaliya aysan qaadan karin wax deyn ah oo gudaha ah ilaa dhammaadka muddada lagu cayimay Istiraatiijiyaddan. Marka la joogo halkaan, “deynta gudaha” waxaa loola jeedaa amaahda laga qaato hay'adaha iyo shakhsiyaadka degan gudaha Dalka, ee uu ku jiro Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (CBS), marka laga reebo lacagaha ku-meel-gaarka ah ee Bangiga Dhexe u horumariyo Dowladda si loo daboolo baahiyaha degdegga ah ee Dawladdu u qabto lacago caddaan ah.

Xaddidaadani waxay xakameyneysaa awoodda Dowladdu ku aasaasi karto, kuna ballaarin karto suuqa deynta gudaha inta lagu guda jiro muddada gaaban. Hase yeeshee, waxaa suuragal ah in heshiisyada mustaqbalka ee Soomaaliya iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka ay wax ka beddelaan ama meesha ka saaraan xaddidkan, taasoo u oggolaan doonta Dowladda in ay si tartiib tartiib ah u soo saarto aalado maaliyadeed oo ay ku qaadanayso amaah gudaha ah, oo ay ka mid yihiin dammaanad-deymeedka Dowladda ee muddada-gaaban (treasury bills).

Qaybta 6-aad: Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee 2025–2029

A. Xulashooyinka Kala Duwan ee Istiraatiijiyadaha Deymaha ee La Dersay

Iyadoo la raacayo yoolalka Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), waxaa si qoto dheer loo dersay loona diyaariyey afar nooc oo istiraatiijiyado maaliyadeed oo kala duwan oo loogu talagalay muddada 2025–2029. Istiraatiijiyaddahan ayaa si xeeldheer u qiimeeyey xaaladda hadda jirta ee deynta Soomaaliya, xadadka iyo xayiraadaha saaran qaadashada amaahda ee hadda jira, iyo sidoo kale shuruudaha la filayo ee amaahda dibadda iyo gudaha ee mustaqbalka.

1. Istaraatijiyadda 1-aad (S1) – Sii Wadida Isticmaalka Amaahda Shuruudaha Deeqsiga ah leh ee Hay'adaha Caalamiga ah iyo Wadamada Saaxibada ah

Istaraatijiyaddan waxay saadaalinaysaa in dhammaan Baahiyaha Maaliyadeed ee Guud (GFN) ee Soomaaliya lagu dabooli doono iyadoo la adeegsanayo amaahyo iyo heshiisyo deymeed oo la mid ah kuwa lagu hago deymaha Dalka ee hadda jira, iyada oo la ilaalinayo astaamaha muhiimka ah ee deymahaas, sida muddada dib-u-bixinta (maturity), muddada ka-nasashada dib-u-bixinta (grace period) iyo heerka kharashka maalgelinta (financing cost).

Lacag-bixinnada ka imanaya Barnaamijka Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka waxaa la filayaa inay sii socdaan ugu yaraan labada sano ee ugu horreeya ee muddada Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS), oo ah 2025–2026. Waxaa sidoo kale suuragal ah in Soomaaliya ay hesho barnaamij cusub oo ay taageerto Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) oo bilaaban kara sanadka 2027, kaasoo siin kara Soomaaliya taageero maaliyadeed oo dheeri ah oo ka caawinaysa in la xoojiyo xasilloonida dhaqaalaha iyo horumarinta mashaariicda muhiimka ah ee Dalka.

Amaahda iyo maalgelinta ka timaadda hay'adaha caalamiga ah waxaa lagu bixin doonaa doolarka Mareykanka, waxaana lagu maamuli doonaa hannaan la mid ah kan deynta hadda jirta ee Soomaaliya ee hay'adaha caalamiga ah. Tani waxay ka dhigan tahay in amaahyadu yeelan doonaan muddo dib-u-bixin ee celcelis ahaan gaaraysa 38 sano, oo ay ku jirto muddada ka-nasashada dib-u-bixinta (grace period) oo dhan 6 sano, iyo kharash maalgelin (financing cost) oo go'an ee celceliskiisu yahay 0.75 boqolkiiba. Deymahan cusub waxaa u badan inay ka yimaadaan hay'addaha caalamiga ah ee Soomaaliya la leh xiriirka soo jireenka ah, sida Bangiga Adduunka iyo Bangiga Horumarinta Afrika.

Sidoo kale, amaahda iyo maalgelinta laba-geesoodka ah ee ka timaadda wadamada saaxiibada ah waxaa lagu bixin doonaa doolarka Mareykanka ama lacago kale oo ku xiran doolarka Mareykanka (sida dirhamka Imaaraatka Carabta, riyaalka Sacuudiga iyo dinarka Kuwait). Deymahan cusub waxaa u badan inay ka yimaadaan wadamada saaxiibada ah ee Soomaaliya la leh xiriirka dhow oo soo jireenka ah, oo ay ku jiraan wadamada Golaha Iskaashiga Khaliijka (GCC). Deymahan waxay yeelan doonaan muddo dib-u-bixin oo 25 sano ah, oo ay ku jirto muddada dib-u-dhigista dib-u-bixinta

oo 5 sano ah (grace period), isla markaana waxay lahaan doonaan kharash maalgelin (financing cost) oo go'an oo gaaraya 1.5%, taasoo la jaanqaadaysa celceliska muddada iyo kharashka maalgelinta ee deymaha laba-geesoodka ah ee hadda Soomaaliya lagu leeyahay.

2. Istaraatijiyadda 2-aad (S2) – Sii Isticmaalka Amaahda Shuruudaha Deeqsiga ah leh iyadoo La Helaayo Maalgelin Mashaariic oo Shuruudo Deeqsi ah Leh

Istaraatijiyaddan waxay soo jeedinaysaa in Soomaaliya ay sii wado adeegsiga hannaanka deymaha ee leh shuruudo deeqsi ah ee hadda jira, isla markaana ay hesho maalgelin iyo deymo cusub oo si gaar ah loogu talogalay mashaariic horumarineed. Amaahdan iyo maalgelintan cusub waxaa laga heli karaa dalalka iyo hay'adaha caalamiga ah ee Soomaaliya la leh xiriirka dhow oo soo jireenka ah, oo ay ku jiraan wadamada Golaha Iskaashiga Khaliijka (GCC) iyo qaar ka mid ah wadamada Aasiya. Hanaanka amaahdan cusub waxaa loo qaabeyn doonaa si looga helo maalgelin iyo amaah leh qayb deeqeed (grant element) u hoggaansamaysa shuruudaha Sanduuqa Lacagta Adduunka ee amaahda deeqsiga ah, inkastoo heerka deeqsinimada ee amaahdan cusub uu yara hooseyn doono marka loo eego shuruudaha deynta hadda jirta ee Soomaaliya lagu leeyahay.

Sanadka 2025 iyo kuwa ku xiga, ilaha iyo habraacyada maalgelinta iyo deymaha waxay ahaan doonaan kuwa la mid ah kuwa lagu qeexay Istiraatiijiyadda Koowaad (S1). Si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sanadka 2028, istiraatiijiyaddu waxay qorsheynaysaa in la dhaqan geliyo hannaan maalgelin mashaariiceed oo lagu bixiyo shuruudo deeqsi ah, si loo daboolo ku dhowaad 25 boqolkiiba (25%) ee baahiyaha sannadle ah ee maalgelinta mashaariicda Dowladda Federaalka, kuwaas oo lagu qiyaasayo inay u dhexeeyaan $20 milyan ilaa $50 milyan oo doolarka Maraykanka ah. Qoondadan 25 boqolkiiba ah si ula kac ah ayaa loo dejiyey, si loo abuuro fursad dhaqaale oo miisaaniyadda ku jirta, taas oo u saamaxaysa Dowladda in mashaariic gaar ah lagu hirgeliyo iyadoo la adeegsanayo habka iskaashiga dheef-wadaagga ah (PPP), kuwaas oo maalgelintoodu ay ka iman doonto ganacsiyada gaarka loo leeyahay.

Deymaha cusub ee shuruudaha deeqsiga ah lagu bixiyo ee loogu talagalay maalgelinta mashaariicda waxay yeelan doonaan kharash maalgelin (financing cost) go'an oo sanadle ah oo dhan 1.5%. Deyn kasta waxaa lagu talagalay inay yeelato muddo dib-u-bixineed oo ah 20 sano, taas oo ay ku jirto muddada ka-nasashada dib-u-bixinta (grace period) oo 10 sano ah. Haddaba, iyadoo la raacayo shuruudahan, qaybta deeqda (grant element) — taas oo ah qaybta deynta ee loo tixgelinaayo deeq maaliyadeed — ayaa lagu qiyaasayaa inay noqoto qiyaastii 35 boqolkiiba.

3. Istiraatiijiyadda 3-aad (S3) – Sii Wadidda Isticmaalka Amaahda leh Shuruudaha Deeqsiga ah Iyadoo la Horumarinayo Suuqa Deynta Gudaha

Istiraatiijiyaddan waxay sii waddaysaa adeegsiga hannaanka deymaha ee ay Soomaaliya hadda ku tiirsan tahay, kaas oo ah qaadashada deymo leh shuruudo deeqsi ah. Hase yeeshee, istiraatiijiyaddani waxay sidoo kale qorsheynaysaa in la bilaabo soo saaridda aaladaha maaliyadeed ee ay Dawladdu ku qaadato deymaha gudaha — sida dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda (treasury bills) — inta lagu jiro labada sano ee ugu dambaysa muddada Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee

Maareynta Deymaha (MTDS). Soo saarista aaladahaan maaliyadeed ee loogu talagalay suuqyada deymaha gudaha waxaa loo fulin doona si barbar socda dhismaha iyo dhaqan-gelinta Nidaamka Maareynta Sarrifka Sugan ee Shilin Soomaaliga cusub (Currency Board), kaas oo la aasaasayo iyada oo la kaashanayo taageerada farsamo ee Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF).

Laga bilaabo 2025 ilaa 2027, ilaha iyo hannaanka deymaha waxay ahaan doonaan sida ku cad Istiraatiijiyadda 1-aad (S1), taasoo micnaheedu yahay in dhammaan deymaha la qaadan doono ay ahaan doonaan kuwo leh shuruudo deeqsi ah, oo kharashka maalgelintoodu (financing cost) hooseeyo, isla markaana leh muddo dib-u-bixin dheer. Laga bilaabo 2028, istiraatiijiyaddu waxay qorsheyneysaa in la soo saaro dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dowladda (treasury bills), kuwaasoo leh kharash maalgelin (financing cost) lagu qiyaasay 10%. Dammaanad-deymeedyadan muddada-gaaban ayaa ka noqon doona qiyaastii 2% wadarta deymaha Dowladda ee sanadka 2028, halka ay gaari doonaan 4% sanadka 2029. Inta kale ee baahida deymeed ee sanadahaas waxaa lagu dabooli doonaa deymaha leh shuruudaha deeqsiga ah, sida ku cad Istiraatiijiyadda 1-aad.

Waxaa xusid mudan in Aaladda Falanqaynta ee loo adeegsaday diyaarinta Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) aysan awoodin inay si buuxda sawir uga bixiso dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda (treasury bills) ee muddada dib-u-bixintoodu ka yartahay halka sano, sida kuwa muddada dib-u-bixintoodu tahay 182-maalmood, 91-maalmood, ama 64-maalmood. Sidaas darteed, si loo gaaro ujeedada falanqayntan, waxaa la isticmaalay dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda ee leh muddo dib-u-bixin oo hal sano ah, si loo helo sawir dhameystiran oo ku saabsan saameynta ay leeyihiin deymaha muddada-gaaban ee gudaha Dalka.

4. Istiraatijiyadda 4 (S4) – Istiraatijiyadda 3-aad oo Lagu Daray Maalgelin Mashaariiceed oo Qayb ahaan Deeqsi ah

Istiraatijiyaddan isku-dhafan waxay ku dhisan tahay Istiraatijiyadda 3-aad, iyadoo la sii wadaayo qaadashada deymaha leh shuruudo deeqsi ah iyo horumarinta suuqa deynta gudaha, isla markaana lagu darayo deymaha loogu talagalay maalgelinta mashaariicda muhiim ah oo leh shuruudo qayb ahaan deeqsi ah (semi-concessional) marka uu dhamaado Barnaamijka Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka ee hadda socda. Sida hadda xaalku yahay, Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) wuxuu xaddidayaa qaadashada deymaha dibadda ee aan lahayn shuruudo deeqsi ah. Hase yeeshee, haddii heshiisyada mustaqbalka ee Soomaaliya iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka ay wax ka beddelaan ama meesha ka saaraan xaddidkan, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay heli kartaa deymo cusub oo qayb ahaan deeqsi ah, kuwaas oo ka kooban ugu yaraan qayb deeqeed gaaraysa 20% (grant element), si loogu maalgeliyo mashaariic gaar ah oo horumarineed.

Laga bilaabo 2025 ilaa 2027, ilaha iyo hannaanka deymeed waxay ahaan doonaan sida ku cad Istiraatijiyadda 1-aad (S1), taasoo micnaheedu yahay in dhammaan deymuhu sii ahaan doonaan kuwo leh shuruudo deeqsi ah. Laga bilaabo 2028, istiraatijiyaddu waxay qorsheyneysaa in la bilaabo isticmaalka deymo qayb ahaan leh shuruud deeqsi ah oo loogu talagalay maalgelinta mashaariicda, si loo daboolo

qiyaastii 25% baahida sannadlaha ah ee Dowladda Federaalka ee mashaariicda, taasoo lagu qiyaasay inta u dhaxaysa $20 milyan ilaa $50 milyan oo doolarka Maraykanka ah sanadkii. Deymahan cusub waxay yeelan doonan kharash maalgelin (financing cost) go'an oo gaaraya 2.5% sannadkii, muddo dib-u-bixin deyn oo dhan 15 sano, iyadoo muddada ka-nasashada dib-u-bixinta (grace period) ay ahaan doonto 5 sano.

Laga bilaabo sanadka 2028 ilaa 2029, Istiraatijiyaddu waxay qorsheyneysaa in la bilaabo soo saarista iyo iibinta dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda (Treasury Bills), si qayb ahaan loogu daboolo baahida guud ee deymaha Dowladda. Dammaanad-deymeedyadan muddada-gaaban waxay dabooli doonaan qiyaastii 2% baahida guud ee deymeed ee Dowladda sanadka 2028, halka ay gaari doonaan ilaa 4% sannadka 2029. Hannaanka la xiriira dammaanad-deymeedyada wuxuu noqon doonaa mid loo fuliyo si waafaqsan habraaca lagu qeexay Istiraatijiyadda 3-aad (S3).

B. Falanqaynta Kharashka iyo Halista ee Istiraatijiyadaha Kala Duwan ee Deynqaadasho

Marka si guud loo eego, isbarbardhigga afarta istiraatiijiyadood ee maareynta deymaha wuxuu muujinayaa in farqiga u dhexeeya kharashaadka iyo halisyada la xiriira deymaha inta lagu jiro muddada shanta sano ah uu yahay mid kooban oo aan weynayn. Sababta ugu weyn ayaa ah in qorshayaasha Soomaaliya ay si xadidan ugu tiirsan yihiin deymaha gudaha, halka Istiraatijiyadaha 3-aad iyo 4-aad oo keliya ay ku jiraan qaadashada deymaha gudaha ee leh kharash maalgelin (financing cost) sare inta lagu jiro labada sano ee ugu dambeysa muddada Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS). Intaa waxaa dheer, muddada ka-nasashada dib-u-bixinta (grace periods) ee ku jiri doona deymaha cusub ee mashaariicda ayaa gacan ka geysanaya in waajibaadka Dowladda ee la xiriira dib-u-bixinta deymaha ay noqdaan kuwo sahlan oo aan culays badan saarin miisaaniyadda, taasoo yareyneysa khatarta iyo dhibaatooyinka la xiriira maaraynta deymaha inta lagu jiro muddada dhexe.

Si kastaba ha ahaatee, maadaama isticmaalka deymaha cusub oo ay ku yaryihiin shuruudaha deeqsinimo la qorsheeynaayo sannadaha dambe ee Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), hadda ma suurtagalayso in si buuxda loo fahmo ama loo qiyaaso saameynta muddada-dheer ee deymahas. Saameynta deymahan, gaar ahaan waajibaadka dib-u-bixintooda iyo kharashka guud ee la xiriira, si buuxda waxaa loo fahmi doonaa sanadka 2029, markaas oo deymaha ay ku yaryihiin shuruudaha deeqsinimo ay qayb weyn ka noqon doonaan wadarta guud ee deynta Soomaaliya.

Jadwalka 3. Tilmaamayaasha Kharashka iyo Khatarta Deymaha ilaa Dhammaadka Sanadka 2029

Tilmaamayaasha Khatarta *(Risk Indicators)*	2024	Sida ay noqon doonto dhammaadka 2029			
	Hadda *(Current)*	S1	S2	S3	S4
Boqolleeyda deymaha magac ahaan dalku qabo ka yihiin GDP-ga *(Nominal debt as % of GDP)*	7.878	10.021	10.022	10.024	10.025
Boqolleeyda qiimaha hadda ee deymaha dalku qabo ka yihiin GDP-ga *(PV debt as % of GDP)*	4.76	6.58	6.62	6.62	6.73

Boqolleeyda lacagaha lagu bixiyo kharashka maalgelinta ee deymaha dalku ka yihiin GDP-ga (Financing cost payment as percent of GDP)		0.039	0.144	0.145	0.146	0.148
Boqolleeyda kharashka maalgelinta guud ee la qiyaasay *(implied financing cost - percent)*		0.50	1.66	1.67	1.73	1.79
Khatarta Dib-u-Maalgelinta (Refinancing Risk)	Boqolleeyda guud ee deynta la filayo in la bixiyo hal sano gudihiis *(Debt maturing in 1 year – % of total)*	0.2	1.0	1.0	1.9	1.9
	Boqolleeyda deynta lagu bixinayo hal sano gudihiis marka loo eego GDP-ga *(Debt maturing in 1 year – % of GDP)*	0.0	0.1	0.1	0.2	0.2
	Celceliska Waqtiga Dib-u-bixinta Deynta Dibadda *(ATM External Portfolio - years)*	21.94	16.34	16.20	16.33	15.97
	Celceliska Waqtiga Dib-u-bixinta Deynta Gudaha *(ATM Domestic Portfolio - years)*	0.00	0.00	0.00	0.50	0.50
	Celceliska Waqtiga Dib-u-bixinta ee Guud ahaan Deymaha *(ATM Total Portfolio - years)*	21.94	16.34	16.20	16.19	15.83
Khatarta Heerka Kharashka Maalgelinta *(Financing Cost Risk)*	Celceliska Waqtiga Dib-u-dejinta Kharashka Maalgelinta *(ATR – years)*	21.9	16.3	16.2	16.2	15.8
	Boqolleeyda deymaha kharashkooda maalgelinta dib-loogu dejinayo hal sano gudihiis *(Debt refixing in 1yr - % of total)*	0.2	1.0	1.0	1.9	1.9
	Boqolleeyda deymaha kharashkooda maalgelinta uu go'an yahay oo ay ku jiraan dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda *(Fixed rate debt incl. T-bills - % of total)*	100.0	100.0	100.0	100.0	100.0
	Boqolleeyda dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda ee ka mid ah guud ahaan deymaha Dalka *(T-bills - % of total)*	0.0	0.0	0.0	0.9	0.9
Khatarta Isbeddelka Sicirka Lacagaha Qalaad *(FX risk)*	Boqolleeyda deymaha ku xisaabsan lacagaha qalaad ee ka mid ah guud ahaan deymaha Dalka *(FX debt - % of total debt)*	100.0	100.0	100.0	99.1	99.1
	Boqolleeyda deymaha muddada-gaaban ee ku xisaabsan lacagaha qalaad marka loo eego kaydka lacagaha qalaad ee Dalka *(ST FX debt - % of reserves)*	0.8	9.7	9.7	9.7	9.7

1. Tilmaamayaasha Kharashka

Iyada oo lagu saleynayo deymaha la qorsheynayo in la helo iyo Baahiyaha

Maaliyadeed ee Guud (GFN), waxaa la filayaa in wadarta guud ee deynta Soomaaliya ay kororto, iyadoo gaari doonta ku dhawaad 10.0% ee wax-soo-saarka guud ee Dalka (GDP) dhammaadka sanadka 2029. Istaraatiijiyadaha 1-aad (S1) iyo 2-aad (S2) waxay muujinayaan in saamiga deyntu ka tahay wax-soo-saarka guud ee Dalka uu ka hooseeyo kan Istaraatiijiyadaha 3-aad (S3) iyo 4-aad (S4). Arrintan waxaa sabab u ah in Istaraatijiyadaha 1-aad (S1) iyo 2-aad (S2) ay si weyn ugu tiirsan yihiin deymaha leh shuruudaha deeqsiga ah, taasoo ka dhigaysa kharashka deynta mid hooseeya.

Marka la eego saamiga lacagaha kharashka maalgelintu (financing cost) ka yihiin wax-soo-saarka guud ee Dalka (GDP), Istiraatiijiyadda 4-aad (S4) ayaa muujinaysa kharashka ugu sareeya, iyadoo ka kordhinaysa saamiga lacagaha kharashka maalgelinta (financing cost) 0.039% oo ay ahaayeen sanadkii 2024 una sii kordhinaysa ilaa 0.148% marka la gaaro dhammaadka sanadka 2029. Tani waxay ka tarjumaysaa isticmaalka ballaaran ee Istiraatiijiyadda 4-aad (S4) ee deymaha aan lahayn shuruudo deeqsi ah oo badan iyo deymaha gudaha. Dhanka kale, Istiraatiijiyadda 1-aad (S1) ayaa leh lacagaha kharashka maalgelinta (financing cost) ugu hooseeya, kuwaas oo lagu qiyaasay 0.144% ee wax-soo-saarka guud ee Dalka (GDP) marka la gaaro dhammaadka sanadka 2029, taasoo sabab u ah diiradda ay Istaraatijiyadda 1-aad (S1) saarayso isticmaalka deymaha dibadda ee leh shuruudaha deeqsiga ah. Intaa waxaa dheer, Istiraatiijiyadaha 2-aad (S2) iyo 3-aad (S3) ayaa muujinaya kharashyo maalgelin (financing cost) oo dhexdhexaad ah, kuwaas oo kala ah 0.145% iyo 0.146% ee wax-soo-saarka guud ee Dalka (GDP).

Waxaa muhiim ah in halkaan si buuxda loo fahmo in kororka weyn ee kharashka maalgelinta (financing cost) ee la filayo sanadka 2029 uu qayb ahaan ka dhashay deymihii hore, kuwaas oo kharashkoodi maalgelinta (financing cost) lagu daray qaddarka asalka ah ee deymaha (capitalized) intii lagu jiray sannadihii hore. Lacagahan kharashka maalgelinta (financing cost) ah ayaa si dhab ah loo bixin doonaa laga bilaabo sanadka 2029. Sidaas darteed, marka la'isla barbardhigo 2024 iyo 2029, culayska kharashka maalgelinta (financing cost) ayaa si weyn u kordhaya, inkastoo shuruudaha deymuhu ay la mid yihiin kuwa hadda jira, ama ay waxyar ka sarreeyaan marka la eego qaar ka mid ah deymaha qorshaysan.

2. Tilmaamayaasha Khatarta

Marka laga eego khatarta dib-u-bixinta deynta (refinancing risk), oo lagu cabbiro saamiga deynta ee lagu qasban yahay in la bixiyo hal sano gudahiis, Istiraatijiyadaha 1-aad (S1) iyo 2-aad (S2) ayaa leh khatarta ugu hooseysa, maadaama aysan ku jirin wax deyn muddo-gaaban ah. Dhanka kale, Istiraatijiyadaha 3-aad (S3) iyo 4-aad (S4) ayaa qorsheynaya isticmaalka deymaha gudaha ee muddada gaaban, taasoo ka dhigan in ku dhawaad 1.9% deynta guud looga baahan doono in la bixiyo hal sano gudahiis.

Dhanka kale, muddada dib-u-bixinta deymaha waxay muujinaysaa celceliska waqtiga ay qaadanayso in deymaha si buuxda loo bixiyo (average time to maturity). Istiraatijiyadda 1-aad (S1) ayaa leh muddada dib-u-bixinta deynta ee ugu dheer, taasoo ahayd 21.94 sano sanadkii 2024, balse hoos ugu dhacaysa ilaa 16.34 sano marka la gaaro sanadka 2029. Dhanka kale, Istiraatijiyadaha 2-aad (S2), 3-aad (S3), iyo 4-aad (S4) ayaa leh muddo dib-u-bixin deyn oo celcelis ahaan ka gaaban midda Istiraatijiyadda 1-aad (S1), kuwaas oo kala ah 16.20 sano ee Istiraatijiyadda 2-aad, 16.19 sano ee Istiraatijiyadda 3-aad, iyo 15.83 sano ee Istiraatijiyadda 4-aad. Tan

waxaa sabab u ah maadama Istiraatijiyadahan ay ka kooban yihiin deymo muddo-gaaban leh ama deymo leh shuruudo deeqsinimadoodu hooseeyso, kuwaas oo inta badan loogu talagalay maalgelinta mashaariic gaar ah, isla markaana ay tahay in si dhakhso ah dib loogu bixiyo.

Maadaama deynta Soomaaliya inta badan ka kooban tahay deymo leh shuruudo deeqsi ah iyo kharash maalgelin (financing cost) go'an (ku dhawaad dhammaan deymaha Dalka marka la gaaro sanadka 2029), waxaa mudan in la xuso in deynta Soomaaliya aysan si weyn ugu nugulayn isbeddelada ku yimaada heerarka kharashka maalgelinta (financing cost). Taasi waxay ka dhigan tahay in xitaa haddii kharashaadka maalgelinta (financing cost) caalamiga ah ama kuwa goboleedka ay isbeddelan, lacagaha kharashka maalgelinta ee Soomaaliya ay sii ahaan doonaan kuwo la saadaalin karo, oo isbeddeladaas aysan saameyn badan ku yeelanayn.

Saameynta hoos u dhaca sicirka sarrifka ee lacagaha qalaad ku leeyahay dib-u-bixinta deymaha Soomaaliya waa mid xaddidan, inkastoo dhammaan deymaha Dalka ay yihiin kuwo dibadda laga leeyahay. Arrintan waxaa sabab u ah in inta badan deymaha Dalka lagu leeyahay ay ku xisaabsan yihiin doolarka Mareykanka ama lacago kale oo si toos ah ugu xiran doolarka Mareykanka, sida dirhamka Imaaraatka Carabta iyo riyalka Sacuudiga. Qayb yar oo deynta Dalka lagu leeyahay ayaa ku xisaabsan dinaarka Kuwait, kaasoo sidoo kale ku xiran koox lacageed oo uu ku jiro doolarka Mareykanka, sidaa darteedna khatarta ka dhalan karta isbeddelada sicirka sarrifka waa mid aad u hooseysa oo aan saameyn weyn ku yeelanayn qorshaha dib-u-bixinta deymaha Dalka.

C. Istiraatijiyadda La Doorbiday

Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka falanqaynta kharashaadka iyo halisyada, iyo sidoo kale isku-darka noocyada kala duwan ee deymaha dibadda iyo gudaha ee suurtagalka ah, Istiraatijiyadda 1-aad (S1) ayaa loo tixgeliyay inay tahay xalka ugu habboon ee Soomaaliya adeegsan karto inta lagu jiro muddada dhexe. Waxaa xusid mudan, in ka dib markii si qoto dheer loo falanqeeyay noocyada kala duwan ee maalgelinta dibadda iyo gudaha, iyo halisyada la xiriira mid kasta, in Istiraatijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ay ku talinayso in la sii wado ku tiirsanaanta deymaha dibadda ee leh shuruudaha deeqsiga ah (concessional loans), si loo yareeyo kharashaadka deynta isla markaana loo xakameeyo halisyada suurtagalka ah, iyadoo la ilaalinayo xasiloonida guud ee deymaha Dalka. Istiraatijiyaddan la doorbiday waxay sii xoojineysaa astaanta deymaha Dalka ee khatarta hoose leh, iyadoo la ilaalinayo siyaasadda deyn-qaadasho ee taxaddarka leh ee hadda jirta. Sidoo kale, istiraatijiyaddan waxay si buuxda ugu hoggaansamaysaa xaddidaadaha saaran deymaha aan lahayn shuruudaha deeqsiga ah iyo deymaha gudaha, sida ku xusan Heshiiska Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF). Tani waxay sidoo kale xaqiijinaysaa in Soomaaliya ku guulaysato fulinta ballanqaadyadeeda ku aaddan Barnaamijka Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka, iyadoo la hubinayo in halista kharashka maalgelinta (financing cost) iyo dib-u-bixinta deymaha ay ahaadaan kuwo hooseeya oo si hufan loo maareeyn karo.

Waxaa suuragal ah in Istiraatijiyadaha 2-aad (S2) iyo 4-aad (S4) mustaqbalka la hirgeliyo iyagoo qayb ka ah hannaan lagu maalgelinaayo mashaariic horumarineed,

iyadoo taasi ku xirnaan doonto heerka xasilloonida dhaqaalaha guud iyo awoodda maaliyadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waqtigaas. Labada Istiraatijiyadood ee S2 iyo S4 waxaa loo arkaa kuwo masuuliyad iyo taxaddar ku dhisan, maadaama ay diiradda saarayaan buuxinta baahiyaha maalgelinta ee muhiimka ah iyadoo halista maaliyadeed lagu ilaalinayo meel hoose. Sidoo kale, Istiraatijiyadda 3-aad (S3) waxaa loo tixgelinayaa mid suurtagal ah oo halisteedu yartahay, balse hirgelinteedu waxay ku xirnaan doontaa heerka horumarka laga gaaro dhismaha iyo dhaqan-gelinta Nidaamka Maareynta Sarrifka Sugan ee Shilin Soomaaliga cusub (Currency Board). Sida hore loogu faahfaahiyay, Istiraatijiyadda 3-aad (S3) waxay xanbaarsan tahay halis aad u yar, maadaama ay oggolaanayso qaadashada deyn gudaha oo kooban—taasoo marka hore ka koobnaan doonta 2% baahida guud ee deymaha loo baahanyahay, ka dibna si tartiib tartiib ah u kordheysa ilaa ay gaarto 4%. Hirgelinta Istaraatijiyadda 3-aad waxaa la filayaa in ay dhacdo sanadaha dambe ee muddada Istiraatijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), taasoo siinaysa Dowladda waqti iyo fursad ay si qoto dheer ugu qiimeyso xaaladda dhaqaale iyo suuqeed ee Dalka ka hor inta aan la bilaabin fulinteeda.

Jaantuska 4-aad. Natiijooyinka Tilmaamayaasha Kharashka iyo Halista ee Afarta Istiraatijiyadood ee Deyn-qaadasho

Boqolleeyda deymaha ka yihiin GDP-ga
(Debt-to-GDP)



Boqolleeyda lacagaha lagu bixiyo kharashka maalgelinta ee deymaha dalku ka yihiin GDP-ga
(Financing Cost-to-GDP)



Boqolleeyda lacagaha lagu bixiyo kharashka maalgelinta ee deymaha dalku ka yihiin dakhliga Dowladda *(Financing Cost-to-Revenue)*



Qaybta 7-aad: Talaabooyinka la Qorsheeyay ee Lagu Fulinayo Istiraatijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee 2025–2029

A. Diyaarinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka

Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka wuxuu noqonayaa hannaanka ugu muhiimsan ee lagu fuliyo Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee 2025–2029, waxaana loo qaabeeynayaa si uu u gaaro ujeeddooyinka Dowladda ee maareynta deymaha. Diyaarinta qorshahan waxaa lagu salayn doonaa natiijooyinka, talooyinka, iyo go'aannada ka soo baxay Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS), iyadoo la hubinayo in uu la jaanqaado miisaaniyadda sannadlaha ah ee Dowladda.

Qorshahan waa inuu muujiyaa baahida ammaahashada sannadlaha ah ee Qaranka (national annual borrowing requirement), wuxuuna diiradda saari doonaa sidii loo heli lahaa deymo leh shuruudo deeqsi ah oo ka yimaadda dalalka iyo hay'adaha caalamiga ah ee Soomaaliya la leedahay xiriirka dhow. Waxa mudnaanta la siin doonaa deymaha leh kharash maalgelin (financing cost) ee hooseeya iyo muddo dib-u-bixin oo dheer, si loo hubiyo in deymaha Soomaaliya ay ahaadaan kuwo la maareyn karo isla markaana waafaqsan ujeeddooyinka Dowladda ee maareynta deymaha. Si joogto ah ayaa loo cusbooneysiin doonaa qorshahan, si uu ula jaanqaado isbeddelada ku yimaada baahiyaha maaliyadeed ee Dowladda iyo xaaladaha guud ee dhaqaalaha Dalka.

Wasaaradda Maaliyadda waxay si dhow ula shaqayn doontaa saaxiibada caalamiga ah ee horumarinta, sida Sanduuqa Lacagta Adduunka, Bangiga Adduunka, iyo Bangiga Horumarinta Afrika, si loo helo deymo dibadda ah oo leh shuruudo deeqsi ah. Qorshuhu wuxuu tixgelin doonaa dakhliga la filayo ee Dowladda iyo isbeddel kasta oo saameyn ku yeelan kara xaaladda maaliyadeed ee Dowladda, iyadoo baahida deymeed loo diyaarinaayo si waafaqsan xaaladda dhaqaale ee Dalka. Si loo xaqiijiyo maarayn waarta ee deymaha ah, Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka (ABP) waxaa la cusbooneysiin doonaa sannad kasta si loo waafajiyo isbeddelada ku yimaada xaaladaha dhaqaale, heerarka deymaha, iyo arrimaha mudnaanta u leh kharash-gareynta Dowladda. Intaa waxaa dheer, Wasaaradda Maaliyaddu waxay la tashan kartaa Bangiga Dhexe ee Soomaaliya si loo hubiyo in Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka uu la jaanqaado siyaasadaha guud ee dhaqaalaha Dalka.

B. Hufnaanta Deynta iyo Xiriirka Deyn-bixiyayaasha

Dowladda Federaalka iyo Wasaaradda Maaliyadda gaar ahaan waxa ka go'an in si hufan oo daahfuran looga warbixiyo sida Soomaaliya u maareyso deymaheeda, isla markaana si joogto ah ula xiriirto deyn-bixiyeyaasha. Bogga internet-ka ee Wasaaradda ayaa sii ahaan doona meesha ugu muhiimsan ee lagu faafiyo macluumaadka la xiriira maareynta deymaha, oo ay ku jiraan warbixinnada sanadlaha iyo kuwa rubuclaha ah ee Maareynta Deymaha. Warbixinadani waxay siinayaan daneeyayaasha macluumaadkii ugu dambeeyay, oo dhameystiran, oo ku saabsan habka amaah qaadashada Soomaaliya, horumarka laga gaaray maaraynta waarta ee deymaha, iyo isbeddellada ku yimid baahiyaha deyn ee Dalka. Sii wadida hufnaanta

iyo warbixinnada joogtada ah waxay ka caawinaysaa daneeyayaasha arrimaha deymaha Soomaaliya inay xog-ogaal noqdaan, isla markaana waxay taageeraysaa dadaallada Soomaaliya ee ku aaddan helista deymo leh shuruudo deeqsi ah, si Dalku uu u gaaro yoolalkiisa horumarineed.

Qaybta 8-aad: Gunaanadka iyo Tallaabooyinka Xiga

A. Gunaanad

Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe Ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee 2025–2029 waxay dejinaysaa qorshe maamul oo xeel dheer oo lagu hagayo maaraynta deymaha guud ee Soomaaliya muddada shanta sano ah ee 2025 ilaa 2029. Istiraatiijiyaddan waxay sidoo kale muujinaysaa sida Dowladda Federaalka ay uga go'an tahay in deymaha lagu hayo heerar la maarayn karo oo dhaqaalaha Dalka aan khatar galinayn. Sidoo kale, waxay cadeyneysaa in mashaariicda horumarineed laga maalgelin karo iyadoo la isticmaalayo amaah leh shuruudo deeqsi ah.

Istaraatiijiyadda la doorbiday, oo ku saleysan in inta badan deynta la soo qaato iyadoo la adeegsanayo amaahyo dibadeed oo leh shuruudo deeqsi ah, waxay leedahay kharashka ugu hooseeya iyo halista ugu yar marka loo eego xaaladaha suuqa iyo awoodaha hay'adaha hadda jira. Istaraatiijiyaddan waxay sidoo kale si buuxda ula jaanqaadaysaa Barnaamijka Taageerada Maaliyadeed ee Muddada-dhexe (ECF) ee Sanduuqa Lacagta Adduunka, iyada oo waafaqsan hanaanka sharci ee maareynta deymaha Dalka.

Istaraatiijiyadaha kale oo suurtagalka ah, sida in si tartiib ah loo bilaabo isticmaalka deymaha loogu talagalay maalgelinta mashaariicda, iyadoo la adeegsanayo amaahyo aan si buuxda u lahayn shuruudo deeqsi ah balse weli leh shuruudo maangal ah oo la jaanqaadi kara xaaladda dhaqaale ee Dalka, ama in la hirgeliyo soo saarista dammaanad-deymeedyada muddada-gaaban ee Dawladda (treasury bills) si loo helo deymo gudaha ah, ayaa weli ah fursado kale oo muhiim ah oo ay Dawladdu ka faa'iideysan karto. Istaraatiijiyadahaan waxaa la dhaqan gelin karaa inta lagu guda jiro sannadaha dambe ee Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), haddii xaaladda dhaqaale ee Soomaaliya ay sii hagaagto, xayiraadaha saaran qaadashada amaahda qaar ay yaraadaan, isla markaana hay'adaha Dowladda ay sii xoojiyaan awooddooda maamul iyo maaliyadeed.

B. Tallaabooyinka Xiga

Si loo hirgeliyo Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS), Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay qaadi doontaa tallaabooyinkan muhiimka ah:

- In la dhammaystiro lana dhaqan geliyo Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka (ABP), kaasoo si buuxda ula jaanqaadaya Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) iyo hannaanka guud ee siyaasadda maaliyadeed ee Dalka.

- In la dhiso aasaaska lagama maarmaanka u ah horumarinta suuqa deymaha gudaha, iyadoo la kaashanayo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya iyo hay'adaha caalamiga ah ee Dalka la leh xiriirka dhow, gaar ahaan Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF).

- In la xoojiyo awoodda iyo xirfadaha Waaxda Maareynta Deynta ee Wasaaradda Maaliyadda, si ay si joogto ah, hufan oo waxtar leh u kormeerto, u qiimeyso, una cusboonaysiiso Istiraatiijiyaddan Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha

(MTDS).

- In la sii joogteeyo hufnaanta iyo isla-xisaabtanka maareynta deymaha, iyadoo si joogto ah loo daabacayo xogta iyo warbixinada la xiriira deymaha, isla markaana la xoojinayo wada-shaqeynta joogtada ah ee lala leeyahay daneeyayaasha kala duwan, sida deyn-bixiyayaasha iyo saaxiibada caalamiga ah ee horumarinta.